



Madxafka farshaxanka ee qaran ahaan la aqoonsan yahay ee ku yaala gudaha Dugsiga Martin Luther King Jr.

Maalin kasta, ardayda dhigata Dugsiga Martin Luther King, waxay dhinac maraan farshaxanka casriga ah ee heerka sare ah. Kuwa u dhexeeyaa qaybaha ay dadka xirfada leh sameeyeen waa shaqada ay ardaydu qabteen, sidoo kale. Laakiin tani waa wax ka badan hal waqt oo wax la soo bandhigayo. Waa madxfaf joogto ah, oo leh shaqooyin isbedelaya oo ka socda farshaxaniistayaasha qaranka iyo kuwa caalamiga ah. Kani waa Madxafka Dugsiga King ee Farshaxanka Casriga ah (KSMoCA), oo ah fikrad ka duwan kuwa kale oo ka jira dalka.

Lisa Jarrett iyo Harrell Fletcher, oo macallimiin jaamacaddeed ka ah Jaamacadda Gobolka Portland qaybta Dugsiga Farshaxanka + Naqshadeynta ayaa wada aasaasaasay madxfafka sanadkii 2014-kii.

“Waxaan dooneynay in ardaydu si toos ah ugu lug yeeshaan maamulka madxfafka,” ayay sheegtay Jarrett. “Waxaan la shaqeynaa ardayda, macallimiinta iyo bulshada iskaashigu ka dhexeeyo si ay u sameeyaan xirfado farshaxan oo ku habboon waaya-aragnimada nololeed ee ardayda Dugsiga MLK Jr iyo bulshada weynta. Waxaan carruurta barnaa dhammaan noocyada kala duwan ee xirfadaha farshaxanka ah oo ay ka mid yihii: farshaxaniistaha, qof dadka haga, ilaaliyaha madxfafka, lahaanshaha sawirrada farshaxanka, qorista xayeysiiska iyo waxyaalo kale oo badan.”

Marka ay shaqadooda bilaabaan, ardaydu waxay la kulmaan farshaxaniistayaal caalamku aqoonsan yahay iyo shaqooyinkooda iyaga oo isticmaalaya bandhigyo, mashruucyo, buugaag iyo wada hadal dadweyne. Laakiin waa wax ka badan waqtiga madadaalada ee laga helayo farshaxanka, ayay sheegtay Maamule Jill Sage.

“Shaqada ay ardaydeenu la qabanayaan farshaxaniistayaasha booqashada ku jooga waa mid had iyo jeer ay isku xiran yihii casharrada iyo manhajka fasalladooda waxayna diiradda saartaa mawduucyada caddaaladda bulshada,” ayay sheegtay Sage.

Mashruucan hadda socda waxaa ku lug leh hoggaanka ardayda ee dugsiga oo farshaxaniistaha Ralph Pugay kala shaqaynaya sameynta farshaxanka dadweynaha oo loogu talagalay jidka dadku maraan oo u dhow Maxkamadda Dhexe ee Degaanka Multnomah, oo la qorsheeyay in la furo gu’ga 2020-ka.

“Waxaan jeclahay in aan la shaqeeyo caruurta oo aan arko farxadooda,” ayay sheegtay Jarret. “In si wadajir ah loola shaqeeyo ardayda iyada oo la iskaashanayo waxay awood u siisaa in ay wadaagaan fikradahaoga iyo aragtidooda ku saabsan farshaxanka.”

Si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah , booqo [website-ka madxfafka](#).

-Pamela Jordan